Dhageysiga baaxadda baaritaanka iyo sameynta soo gudbinada Su'aalaha Soo Noqnoqday(FAQs)

Haddii xogta aad raadineyso aysan ku jirin boggan, ama haddii aad qabto wax su'aalo ah, fadlan la xiriir Adeegyada Dhimasho Baarista adigoo iimayl ku diraya coronial.response@justice.govt.nz ama wacaya 0800 88 88 20.

Boggaan, waxaad ka heli doontaa jawaabaha su'aalaha soo noqnoqda qaarkood (FAQs) ee ku saabsan dhageysiga dacwada ee Diisambar ee baaxadda baaritaanka iyo sameynta soo gudbinada.

Su'aalahan Soo Noqnoqday(FAQs) waxay daboolayaan:

- Dhageysiga baaxadda baaritaanka.
- Sameynta soo gudbinta

Ku saabsan dhegeysiga

Maxaan sameeyaa haddii aan rabo inaan shakhsi ahaan uga qayb galo ama aan rabo inaan meel fog ka daawado dhegeysiga?

Haddii aad horeyba isu diiwaangelisay inaad qof ahaan uga qaybgasho ama aad meel fog ka daawato, uma baahnid inaad wax samaysid.

Haddii aadan isdiiwaangelin, waxaad iska diiwaangelin kartaa halkan https://consultations.justice.govt.nz/comms/1a09bc2b/

Waxaad u baahan doontaa inaad isdiiwaangeliso ugu dambayn 23 Diisambar 2021.

Ma ka daawan karaa dhegeysiga onlayn?

Haa, laakiin waa inaad isdiiwaangelisaa ugu dambayn 23 Disambar 2021.

Faahfaahinta sida meel fog looga daawado ayaa laga dhigi doonaa mid la heli karo markii lagu dhawaado taariikhda dhegeysiga.

Dhageysiga ma la fasiri doonaa?

Maya

Si kastaba ha ahaatee, haddii aad shakhsi ahaan uga qayb galayso dhageysiga oo aad u baahan tahay caawimaada turjubaan si aad ula xiriirto qareenkaaga ama shaqaalaha maxkamadda inta aad dhegeysiga ku jirto, waanu yeelan doonaa turjubaano diyaar ah oo ku caawiya. Haddii aad u malaynayso inaad u baahan tahay caawinaad, fadlan tilmaan tan marka aad

buuxinayso foomka diiwaangelinta si aad uga qaybgasho/daawato dhegeysiga meel fog ama adoo iimayl u diraayocoronial.response@justice.govt.nz.

Bal kawaran haddii aan joogo meel ka baxsan Christchurch? Ma heli doonaa dhaqaale aan kaga qayb galo dhageysiga?

Faahfaahinta nooca maalgelinta ay heli karaan dadka si ay uga qaybgalaan dhegeysiga 22-24 Febraayo 2022 hadda ayaa laga shaqaynayaa. Waan kuu soo sheegi doonaa marka go'aan laga gaaro arrintan.

Waxaa lagugula talinayaa inaad is diwaangeliso xiisahaaga si aad uga qaybgasho xitaa haddii go'aankani ku xiran yahay maalgelinta la heli karo.

Dad itaageero ma la iman karaa?

Haa, laakiin waa haddii boos bannaani jiro.

Intee in le'eg ayay dhegaysigu qaadanaysaa?

Dhageysiga ayaa la filayaa inuu qaato saddex maalmood wuxuuna socon doonaa si waafaqsan saacadaha maxkamadda caadiga ah (laga bilaabo 10 subaxnimo ilaa 5 galabnimo oo ay nasashooyin u dhexeeyaan).

Sameynta soo gudbinta

Yaa sameyn kara soo gudbino?

Keliya qoysaska Shahiidka iyo kuwa kale ee danaynaya ayaa sameyn kara soo gudbino. Qareenkooda asagoo matalaya ayuu sameyn karaa soo gudbino.

Sideen qoraal ahaan u sameyn karaa soo gudbin?

Waxaad samayn kartaa soo-gudbin qoraal ah oo ka hadlaya baaxadda la soo jeediyay ee baaritaanka lagu dejiyay Minute-ka madaxa dhimashada baaraha(Chief Coroner's Minute). Waxaad banaanka soo dhigi kartaa dooddaada ku saabsan qaybaha Minute-ka ee aad diidan tahay, iyo sababta.

Qorista soo gudbinta sharciga waxay noqon kartaa hawl adag waxayna u baahan tahay aqoon sharci oo ay ku jirto sharciga kiiska khuseeya. Haddii aad leedahay qareen, waxaa lagugula talinayaa inaad weydiiso qareenkaaga inuu sameeyo soo gudbino asagoo ku matalaaya.

Soo gudbinada qoran waa in lagu diraa coronial.response@justice.govt.nz ugu danbeyn **4 Fabraayo 2022.**

Goorma ayeey ku egyihiin sameynta soo gudbinada qoran?

Dhammaan soo gudbinada qoraalka ah ee dhinacyada danaynaya waa in la helaa ugu danbeyn **5:00 galabnimo 4 Fabraayo 2022.**

Haddi aan sameeyo soo gudbin qoraal ah, miyay tahay inaan ka qayb galo dhagaysiga?

Maya

Coroner Windley wuxuu si taxadar leh u tixgelin doonaa dhammaan qoraallada soo gudbinada haddii adiga ama qareenkaagu aad ka soo qayb gashaan dhageysiga iyo haddii kale.

Soo gudbinada qoraalka ah miyay u baahan yihiin inay noqdaan qaab gaar ah?

Haddii qareenkaagu uu kuu samaynayo soo gudbin qoraal ah, soo gudbintu waxay raacaysaa qaabka soo gudbinta sharciga ee caadiga ah.

Haddii aad adigu samaynayso soo gudbintaada, waxaad ku soo gudbin kartaa dukumeenti Word ama PDF ah, ama kusoo qorida iimaylka.

Soo gudbinta qoraalka ah waa inay si cad u qeexdaa qaybta Minute-ka ee soo gudbintu la xiriirto. Tusaale ahaan, miyay la xiriirtaa:

- fasiraadda Xeerka Dhimasho Baarayaasha, ama sharciga kiiska;
- tixgalinada muhiimka ah ee lagu sheegay cutubka 67 ee Minute-ka ee hagaya habka Madaxa Dhimasho Baaraha;
- jawaabta arrinta gaar ah ayaa lagu soo koobay lifaaqa/qabsinka A.

Ma samayn karaa soo gudbin hadal ah?

Haa

Waxaan kugula talineynaa in uu qareenkaaga tan kuu sameeyo.

Haddii aadan lahayn qareen oo aad rabto inaad adigu sameyso soo gudbin hadal ah, fadlan iimayl u soo dircoronial.response@justice.govt.nz si aad u ogeysiiyo Adeegyada Dhimasho Baarista.

Waxaad sidoo kale u baahan doontaa inaad bixiso **dulmar qoran** oo ku saabsan soo gudbinta aad rabto inaad samayso ugu dambayn **4 Febraayo 2022.**

Haddii aan horayba u lahaa qareen kaas oo sameynaya soo gudbinta hadalka ah asagoo imatalaya, sidoo kale ma ka hadli karaa dhegeysiga?

Haddii aad leedahay qareen ku matalaaya, waxay awoodi doonaan inay sameyan soo gudbin hadal ah marka la joogo dhageysiga. Caadi ahaan, cidda danaynaysa laftoodu ma samaynayso soo gudbin hadal ah sidoo kale.

Si kastaba ha ahaatee, haddii ay jiraan duruufo gaar ah, Coroner Windley ayaa tixgelin doonta oggolaanshaha tan. Tani waxay noqon doontaa mid dhif iyo naadir ah. Haddii aad rabto inaad tan samayso, waa inaad marka hore kala hadashaa qareenkaaga.

Sideen qof ahaan u sameeyn karaa soo gudbin waqtiga dhegeysiga haddii aanan qareen lahayn?

Haddii aadan lahayn qareen, waxaad samayn kartaa soo gudbin afka ah laftaada. Waxaad sidoo kale u baahan doontaa inaad bixiso **dulmar qoran** oo ku saabsan soo gudbinta aad rabto inaad sameyso ugu danbeyn **4 Febraayo 2022.**

Si aad isugu diyaarisid inaad sameyso soo gudbinta hadalka ah marka la joogo dhageysiga, waxaan kugula talineynaa inaad:

- Si cad u qeexdo sababta ay tahay in wax lagu daro baaritaanka marka la eego waxa uu Madaxa Dhimasho Baaraha uu ku sheegay Minute-ka.
- Hoos kuqoroto waxyaabaha ugu muhiimsan ee aad rabto inaad tiraahdo. Waxaad tan ka akhrin kartaa waqtiga dhegeysiga.
- Ku celceli waxa aad rabto inaad sheegto. Tani waxay kaa caawinaysaa inaad hubiso inay caddahay oona macquul tahay.

Xilliga dhegeysiga, Coroner Windley ayaa ku ogeysiin doontaa marka ay tahay wakhtigaaga inaad hadasho. Tani waxay u badan tahay inay noqoto ka dib marka dhammaan qareennada ay soo jeediyaan/gudbiyaan soo gudbinadooda.

Ma samayn karaa soo gudbin hadal ah si shakhsi ah iyada oo aan horay loo shaacin?

Maya

Ma jiri doontaa jadwal ama wakhti xaddidan oo soo gudbinta hadalka ah?

Waxaa jiri doona jadwal ah cidda soo jeedinaysa dhageysiga. Waxaa muhiim ah in dhammaan kuwa doonaya in lagu maqlo dhegeysiga ay helaan fursad lagu maqlo.

Marka aynu ogaano inta koox ee samaynaysa soo gudbinta hadalka ah, Coroner Windley waxa ay tixgalin doontaa in wakhtiga xaddidan ee qof kastoo hadlaaya uu daruuri yahay iyo in kale.

Soo gudbinada hadalka ah looma baahna in ay daboolaan wax kasta oo lagu sheegay soo gudbinada qoraal ahaanta ah balse waa in ay daboolaan/qeexaan qodobada ugu muhiimsan.

Dadku miyeey keeni karaan soo-gudbino horay loo duubay?

Maya

Ma lagu sameeyn karaa soo gudbinta luqad kale?

Waxaa la door bidaa in soo gudbinta lagu sameeyo mid ka mid ah luqadaha rasmiga ah ee New Zealand: te reo Māori, Ingiriis, ama Luqadda dhegoolaha ee New Zealand.

Haddii soo gudbintaada qoraalka ah aysan ahayn Ingiriis, waa inaad sidoo kale keentaa nuqul sharci ahaan la aqbali karo oo Ingiriisi sax ah isla wakhtigaas.

Haddii aad sameyneyso soo gudbinta hadalka ah oo aadna ku samaynayso luuqad kasta oo kale oo aan Ingiriisi ahayn, waxaad u baahan doontaa inaad nagu soo wargeliso si aan u diyaarino turjumaan inuu joogo dhegeysiga. Waa inaad sidoo kale bixisaa dulmarka qoraal ahaanta ah ee ku saabsan soo gudbintaada hab Ingiriis ah.

Miyeey Coroner Windley ku dhawaaqi doontaa go'aankeeda baaxadda ka hor dhammaadka dhegeysiga?

Tani macquul ma ahan. Waxay u badan tahay in Coroner Windley ay ku dhawaaqi doono go'aanka wakhti ka dib dhegeysiga, ka dib marka ay tixgeliso dhammaan soo gudbinada qoraal ahaanta ah iyo soo-gudbinada lagu soo bandhigay dhageysiga.